
JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOMAALIYA

WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA
XAFIISKA MANAAHIJTA

# JUQRAAFI

## FASALKA LABAAD



F.A.

# JUQRAAFIGA

## FASALKA

## LABAAD EE DUGSIGA HOOSE

## 2

JAMHUURIYADDA DIMUQORAADIGA SOOMAALIDA

WASAARADDA WAXBARASHADDA IYO BARBAARINTA

XAFIISKA MANAAHIJTA

Buuggan lama daabacan karo lamana guurin karo iyadoo aan Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta laga helin Ogolaansho

Waxaa lagu daabacay
Madbacadda Qaranka
XAMAR, 1975

# TUSMO

| | Bogga |
|---|---|
| Gaadiidka | 1 |
| Gaadiidka dhulka | 1 |
| Gaadiidka baadiyaha | 1 |
| Gaadiidka badda iyo cirka | 2 |
| Gaadiidka badda | 2 |
| Gaadiidka cirka | 3 |
| Jidadka | 6 |
| Xiriirka miyiga iyo magaalada | 7 |
| Jihooyinka | 8 |
| Sida lagu garto jihooyinka waaweyn maalintii | 9 |
| Sida lagu garto jihooyinka waaweyn habeenkii | 10 |
| Jihooyinka yaryar | 11 |
| Habka loo sawiro khariidadda iyo akhriskeeda | 12 |
| Meheradaha dadka Soomaaliyeed | 13 |
| Xoolaha nool | 14 |
| Dalka Soomaalida iyo xoolaha nool | 15 |
| Daaqa dhulka | 16 |
| Gobollada iyo xoolaha nool | 18 |
| Geela | 18 |
| Ariga | 18 |
| Lo'da | 19 |
| Dhibaatooyinka xoolaha nool | 19 |
| Dhibaatooyinka ganacsiga xoolaha nool | 22 |
| Beeraha | 23 |
| Meelaha beerista ku habboon | 24 |
| Noocyada beeraha | 24 |
| Beeraha roobka ku baxa | 24 |
| Beeraha waraabinta | 25 |
| Dhibaatooyinka beeraha hortaagan | 25 |
| Horumarinta beeraha | 26 |
| Biyaha | 27 |
| Roobabka | 27 |
| Webiyada | 27 |
| Ceelasha | 27 |
| Wakaaladda Horumarinta Biyaha | 28 |

# H O R DH A C

## BUUGGA JUQRAAFIGA EE FASALKA LABAAD

Casharrada ku jira buuggan waa dhawr qaybood oo ay ka mid yihiin: Gaadiidka, Jihooyinka iyo sida loo garan karo, Xoolaha Nool,B eeraha iyo Biyaha.

Casharradu marka laga reebo jihooyinka waxay ku wada saabsan yihiin wax wadanka gudihiisa laga heli karo. Waxa kalee oo ay casharradu ku saabsan yihiin waxyaalo had iyo goor horumar u baahan oo maalin walba maalinta ka dambaysa sii fiicnaanaya. Sidaa aawadeed waxa loo baahan yahay in macallinku waxyaalahaa wadanka gudihiisa laga helayo uu ardayda tuso markii ay u suura gasho. Waa in macallinku ardayda u faahfaahiyaa faa'iidooyinka xoolaha nool, beeraha, biyaha, gaadiidka iwm. Tan kale ee loo baahan yahay waxa weeye in macallinku la socdo horumarka ku saabsan arrimahaa duruusta ku jira oo uu maalin walba wixii horukac ah ardayda la socodsiiyo.

Xafiiska Manaahijtu wuxuu u mahad naqayaa Jaalle Shariif Cali Cabdilkariin iyo Maxamed Xirsi Muuse oo buugga qoray, Maxamed Abokor Guuleed, Fu'aad Maxamed Raage iyo Aamina Maxamed Aamin oo duruusta garaacay iyo Guddigii sawiradda sameyay.

(Saleebaan Maxamuud Aadan)
Maamulaha Xafiiska Manaahijta
Wasaarada Waxbarashada iyo Barbaarinta.

## GAADIID

Gaadiidka lagu isticmaalo adduunka wuxuu u qaybsamaa saddex qaybood:

b) Gaadiidka Badda.
t) Gaadiidka Dhulka.
j) Gaadiidka Cirka.

## GAADIIDKA DHULKA

Gaadiidka dhulka aad iyo aad ayuu u fara badan yahay, waxaana ka mid ah baabuurta, baaskeeladaha, dhugdhuglayada, awrta, dameeraha fardaha, iyo baqlaha.

Gaadiidka waxa loo isticmaalaa in lagu safro ama lagu dhoofo iyo in wax lagu qaato ama dhoofiyo. Gaadiidku nolosha aadamiga aad ayuu qiimo weyn ugu leeyahay, dhibaatooyin badanna wuu ka furtay.

**LAYLIS:**

1. Sheeg saddex xawayaan oo gaadiid ahaan loo isticmalo?
2. Faallo ka bixi faa'iidooyinka dadku ka helay gaadiidka?
3. Sheeg gaadiidka ugu badan ee dalkeena lagu isticmaalo?

## GAADIIDKA BAADIYAHA

Dadka ku nool miyiga waxyaalaha ay u iib geeyaan magaalooyinka waxay ku qaadaan awrta, dameeraha, dibida iyo baabuurta oo aad loogu isticmaalo dalkeenna, kiradooduna ay yartahay. Baabuurtu waxay qaadaa dadka iyo waxyaala culus ee ay ka mid yihiin badarka Galleyda, Xoola nool, iyo Hargaha waxayna geeyaan magaalooyinka ay iib wanaagsan kaga helayaan.

Awrta, dameeraha iyo dibidu waxay qaadaan sida badan biyaha, caanaha, cawska iyo wixii la mid ah, waxayna geeyaan tuulooyinka iyo magaalooyinka u dhow.

LAYLIS:

1. Maxay Baabuurtu qaadaan?
2. Awrta iyo Dameeruhu maxay sida badan qaadaan?
3. Reer guuraagu gaadiidka ay rartaan maxaa ugu badan?
4. Maxay reer miyigu geeyaan tuulooyinka iyo magaalooyinka maxayse ka qaataan tuulooyinka iyo magaalooyinka?

## GAADIIDKA BADDA IYO CIRKA

Casharkii hore waxaynu ku baranay gaadiidka dhulka ee dalkeenna, casharkana waxa aynu ku baraynaa gaadiidka badda iyo cirka.

1. **Gaadiidka Badda.**

Sida gaadiidka dhulku ugu baahan yahay waddooyin ayaa gaadiidka badduna ugu baahan yahay dekado ay maraakiibtu iyo dayuuradahuba ku soo xirtaan si ay waxay sidaan ugu dejiyaan, waxna uga qaadaan.

Dalkeennu wuxu leeyahay xeeb dheer oo magaalooyin fara badani ku yaalliin. Magaalooyinkaa waxa ka mid ah:
Xamar, Marka, Baraawe iyo Kismaayo oo ku yaal xeebta Badweynta Hindiya iyo Berbera, Saylac, oo ku yaal xeebta Badda Cas.

Dekada magaalo madaxda Xamar waa laga shaqeenayaa oo waa la weynaynayaa si maraakiibta waaweyni wax uga qaadi karto waxna ugu dejin karto.




LAYLIS:

1) Waa maxay shayga ugu horreeyaa ee gaadiidka baddu u baahan yahay?
2) Sheeg laba (2) magaalo oo ku yaal xeebta Badweynta Hindiya iyo laba (2) ku yaal xeebta Badda Cas ?
3) Ka faallood faa'iidooyinka gaadiidka badda.


## GAADIIDKA CIRKA

Gaadiidka cirka waa dayuuradaha isaga duula dalka gudihiisa iyo dibadiisaba. Dayuuraddu waxay u baahan tahay gego ay ka haaddo kuna degto. Magaalooyinka dalka gudihiisa ee gego dayuuraduhu ka haadaan leh waxa ka mid ah: Magaalo madaxda Xamar, Hargeysa, Burco, Boosaaso, Qandala, Gaalkacayo, Beled-Weyne, Baydhabo iyo Kismaayo.

Gegooyinka wanaagsan ee laga shaqeeyey waa gegada Muqdisho, Kismaayo iyo Hargeysa waxayna leeyihiin qalabka dayuuradaha lagula hadlo.






Meelaha Duyuuradaha Sharikada Soomaaliyeed tagaan dalka Gudihiisa iyo Dibeddiisaba.

Kirada dayuuraduhu way ka qaalisan tahay kirada baabuurta. Sidaa darteed ayaa dadka dayuuradaha raacaa dalka gudihiis ay u yar yihiin.

**LAYLIS:**

**1. Haddii weertu run tahay (R) ku qor meesha bannaan, haddii kalana (B) ku qor.**

b) .................................... Dayuuraduhu magaalooyinka oo dhan way fariisan karaan.

t) .................................... Xamar iyo Hargeysa waxa ay ka mid yihiin magaalooyinka gego dayuuradeed oo laga shaqeeyey leh.

j) .................................... Kirada dayuuraddu wey ka qaalisan tahay tan baabuurta.

x) .................................... Dadka dayuuradaha raaca dalka gudihiisu aad bay u badan yihiin.

## JIDADKA

Magaalo waliba waxa ay leedahay jidad ku xira magaalooyinka kale. Magaalada Xamar masalan waxa soo gala laba jid oo waaweyn: Ka hore oo ka yimaada Afgooye, Gobolka shabeelada Hoose iyo ka labaad oo ka yimaada Balcad Gobolka shabeelada dhexe.

Jidka hore marka uu ka baxo Magaalada Xamar ee uu gaaro magaalada Afgooye laba jid ayuu noqdaa, jid taga marka iyo baraawe halkaasna uga gudba Gobolka Jubada hoose iyo jid taga Wanla-Weyn halkaasna uga gudba Gobolka baydhabo.

Jidka labaad ee ka baxa Xamar wuxuu tagaa Balcad iyo Jowhar, halkaasna wuxuu uga gudbaa gobolka Hiiraan.

Labada jid aan kor ku soo sheegey intooda badani waa laami oo had iyo goor gaadiidku wuu mari karaa, hase yeeshe waxa jira meelo ciid ah oo aan baabuurtu xilliga roobabka mari karin.



Waxa aad sida kor ku taal oo kale uga hadli kartaa jidadka magaaladaada soo gala gaar ahaan iyo jidadka degmadaada iyo gobolkaaga ku yaal caam ahaan.

**LAYLIS:**

1. Ka hadal jidadka degmada iyo Gobolka aad degantahay?
2. Maxaa dadka ku kallifay in ay jidad laami ah sameestaan?
3. Waa maxay faa'iidada jidadka laga shaqeeyey?
4. Waa maxay dhibaatada jidadka caadiga ah ee aan laga shaqayn ?

## XIRIIRKA MIYIGA IYO MAGAALADA

Reer miyiga iyo reer magaaluhu waa laba bulsho oo aan kala maarmin, maxaa yeelay noloshooda ayaa isku xiran.

Reer miyigu xoolaha nool, Subaga, Caanaha iyo waxa beerohooda ka baxa ayey magaalooyinka geeyaan oo ay ka iibiyaan.

Sidaa si la mid ah reer magaaluhuna cunto, dhar, kabo iyo wax yaalo kale oo badan ayuu ka iibiyaa reer miyiga.

Magaalooyinku waxay ku dhisan yihiin reer miyiga oo la'aanta reer miyiga ma noolaan karaan. Reer miyigu isagu waa noolaan karaa la'aanta reer magaalaha in kasta oo noloshooda wax ka dhinmayaan haddii aan reer magaaluhu jirin.

Taas macneeheedu wuxuu yahay sidii aynu hore u sheegnay in labada bulsho is taageeraan oo mid waliba ta kale u baahan tahay.

**LAYLIS:**

1 Haddii weertu run tahay (R) ku qor meesha bannaan, haddii kalena (B) ku qor.

b) .................................... Wax xiriir ah oo ka dhexeeya reer miyiga iyo reer magaalaha ma jiro.

t) .................................... Reer miyigu waxba ka ma iibiyo reer magaalaha.


j) .................................... Labada bulsho ee reer miyiga iyo reer magaaluhu ma kala maarmaan.

2. Sheeg (3) shay oo reer miyigu magaalooyinka uga baahdo.
3. Sheeg (3) shay oo reer magaaluhu miyaga uga baahdo.
4. Beeralaydu ma reer miyi baa mise waa reer magaale.

## JIHOOYINKA

Afarta jiho ee dhulku u qaybsamaa waa:

1. Bari.
2. Waqooyi.
3. Galbeed.
4. Koonfur.






Fallaarta kor u jeedaa waxa ay tilmaameysaa Waqooyi, ta hoos u jeedaana waxa ay tilmaameysaa Koonfur.


Fallaarta midig ujeeddaa waxa ay tusaysaa Bari, tan bidix u jeedaana waxa ay tusaysaa Galbeed.

Bari waa jihada qoraxdu ka soo baxdaa, Galbeedna waa jihada qoraxdu u dhacdaa. Waqooyi waa jihada aynu u jeesano marka aynu tukanayno, Koonfurina waa jihada dhabarkeenu ujeedo marka aynu tukanayno.

LAYLIS:

1. Jihada qoraxdu ka soo baxdo magaceed?
2. Jihada qoraxdu ka dhacdo magaceed?
3. Xaggee baad u jeesataa marka aad tukanaysid?
4. Fallaarta hoos u jeedaa xaggee bay tilmaameysaa ?

## SIDA LAGU GARTO JIHOOYINKA WAAWEYN MAALINTII



Haddii aad toostid subaxdii waqti hore oo aad eegtid jihada qaraxdu ka soo baxdo, waxa aad arkeysaa qoraxdii oo la moodo in ay soo baxayso. Haddii aad u fiirsatid maalintaa qoraxda, waxa aad arki kareysaa qoraxdii oo aad moodid in ay cirka korayso ama sare u socota ilaa ay gaarto duhurka, markaas oo ay kuugu muuqanayso in ay ku beegan tahay cirka bartamihiisa.

Halkaas waxa la mooda in ay Qoraxdu hoos uga soconayso ama uga daadegeyso ilaa ay qarsoonto ama ay ku libidho jihada tii hore ee la moodayey in ay ka soo baxday ka ka soo hor jeeda. Marka qoraxdu dhacdo waxa dhamaaneysa maalintii waxana bilaabmaya habeenkii.

Jihada la moodo in ay qoraxdu ka soo baxdo waa Bari, jihada ay u dhacdaana waa Galbeed.

Haddii aad is taagtid dugsiga hortiisa oo aad ku beegtid wejigaaga halka qoraxdu ka soo baxdo oo labadaada gacmoodna balaar u fidisid waxa aad garan kareesaa jihooyinka:

| | |
|---|---|
| Dhanka | Wejigaaga ku beegani waa Bari, |
| Dhanka | Dhabarkaaga ku beegani waa Galbeed, |
| Dhanka | Gacantaada bidix xigaa waa Waqooyi, |
| Dhanka | Gacantaada midig xigaana waa Koonfur. |

## SIDA LAGU GARTO JIHOOYINKA WAAWEYN HABEENKII



Xiddigga Qiblada (Qibleeye




Jihooyinka Waaweyn waxa lagu gartaa habeenkii xiddiga lagu magacaabo Qibliye (Qudbi). Waxuuna had iyo jeer ka soo baxaa Waqooyi (ka muuqdaa Waqooyi). Marka qofku ku beego wejigiisa xiddigaa (qibleeyaha) wuxuu gartaa Waqooyi oo ah halka wejigiisa ku beegan, iyo jihooyinkii kale oo dhan. Bari waxa uu ka xigaa midig, Galbeedna bidix, dhabarkiisuna waxa uu ku beegan yahay koonfur.

**LAYLIS:**

1. Sheeg magaca xiddiga habeenkii lagu garto waqooyi?
2. Marka Wejigaagu ku beegan yahay xiddigaa jihada dhabarkaaga ku beegan magaceed?
3. Marka aad tukanayso jihada midigtaada ku beegan magaceed?
4. Tan bidixdaad ku beeganna magaceed?

## JIHOOYINKA YARYAR

Jihooyinka waaweyn ee afarta ah waxa ka farcama jihooyin yaryar oo iyaguna afar ah, oo loo yaqaan Waqooyi Bari, Koonfur Bari, Waqooyi Galbeed iyo Koonfur Galbeed.




Jihooyinka waaweyn iyo kuwii ka farcamay

Waqooyi Bari waa jihada u dhaxaysa Waqooyi iyo Bari. Waqooyi Galbeed waa jihada u dhaxaysa Waqooyi iyo Galbeed. Koonfur Bari waa jihada u dhaxaysa Bari iyo Koonfur. Koonfur Galbeed waa jihada u dhaxaysa Galbeed iyo Koonfur.

**1. Haddii weertu run tahay (R) ku qor meesha bannaan, haddii kalena (B) ku qor.**

b) ........................................ Jihada u dhaxaysa Waqooyi iyo Bari waa Waqooyi Bari.

t) ........................................ Jihada u dhaxaysa Waqooyi iyo Galbeed waa Koonfur Bari.

j) ........................................ Jihada u dhaxaysa Bari iyo Koonfur waa Koonfur Bari.

x) ........................................ Jihada u dhaxaysa Galbeed iyo Koonfur waa Koonfur Bari.

## HABKA LOO SAWIRO KHARIIDADDA IYO AKHRISKEEDA

Khariidad kasta oo kaa soo hor baxda ha ku qornaato bug ama warqad had iyo jeer waqooyi waxa uu xigaa warqada dhankeeda sare, koonfurina dhanka hoose, barina dhanka midig, Galbeedna dhanka bidix. Sidaasi waa hab dadka aduunka oo dhami ay isku wada raacsanyihiin ama waafaqsan yihiin.

Khariidad kasta waxa ay leedahay astaamo inoo sahla akhriskeeda. Marka aad doonaysid in aad baratid akhriska khariidadaha waa in aad marka hore si fiican u baratid astamaha ku hoos qoran khariidadda.

Astaamaha khariidadda waxa lagu muujiyaa furaha khariidadda oo lagu sameeyo khariidadda hoosteeda. Astaamaha khariidadda waxa aad si fiican u dhigan doontaa sanadka waxbarashada ee soo socda.

**L A Y L I S :**

1. Waqooyiga khariidadda xagggee buu xigaa?
2. Maxaa inoo sahla akriska khariidadda?
3. Astaamaha khariidadda xaggee baa lagu muujiyaa?
4. Maxaa muujiyaa astaamaha khariidadda?



## MEHERADAHA DADKA SOOMAALIYEED

Meheradaha dadka Soomaaliyeed ay ku xoogsadaan way badan yihiin. Casharkan waxa aynu ku dhiganaynaa meheradahaa kuwa ugu badan ee ay dadka badankiisu ku xoogsadaan.

Dadka Soomaaliyeed badankoodu waxay ku nool yihiin baadiyaha waxa ayna dhaqdaan xoolohooda waxa ay ka helaan caano, subag, hilib iyo hargo ay iibsadaan. Marka ay u baahdaan reer miyigu xoolaha nool ayay magaalada u iib geeyaan, markaas ayay lacagta laga siisto ku iibsadaan dhar iyo cunto.

Dadka Soomaaliyeed qaarkood beero ayay fashaan. Beerahaa badankooda waxay ku beertaan wax ay iyagu uun cunaan. Beeralayda qaarkooda kale dhul weyn ayay beertaan oo ay ka beeraan waxay iyagu cunaan iyo waxay magaalooyinka u iib geeyaanba. Xeebaha dadka degani way kalluumaystaan.

Magaalooyinka dadku shaqooyin kala duwn ayay ka xoogsadaan. Qaar waxay ka xoogsadaan ganacsi, qaarna dowladda ayay u shaqeeyaan. Meheradaha dadku way badan yihiin oo waxa ka mid ah, birtumidda, nijaaradda, daara dhiska, dilaalidda iyo kuwo kale ka sii duwan.

**L A Y L I S :**

1. Dadka Soomaaliyeed ee baadiyaha ku nooli maxay qabtaan?

2. Reer miyigu xoolohooda maxay ka helaan? Waxa ay xoolaha ka helaan sidee bay yiraahdaan?

3. Dadka beeraha leh ee dhulkeena joogaa maxay badankoodu wax u beertaan?

4. Waxaad sheegtaa afar meheradood oo ay dadka magaaladdu ka xoogsadaan?

## XOOLAHA NOOL

Dalka Soomaaliyeed waxa uu hodank u yahay xoolaha nool oo lagu dhaqo meelaha baadka iyo biyaha leh. Xoolaha Soomaalidu dhaqataa waxay ka kooban yihiin Geel, Lo', Ari iyo Gammaan.

Xoolaha nooli dalkeena dhaqaalihiisa waxay u yihiin saldhig. Sababtu waxa weeye iyada oo waxa aynu debedda u dirro, aynu lacagta ka hello ay xoolaha nooli ugu badan yihiin. Xooleheena nooli waxay inoo soo hooyaan lacag inoo sura gelisa inaynu adduunka kale wax kaga soo iibsano.

Dadka xoolaha nool dhaqdaa aad bay u yaqaaniin sida xoolaha loo xanaaneeyo, dhulka daaqa iyo biyaha leh, cudurada xoolaha iyo wixii kale ee ku saabsanba. In kasta oo ay taasi jirto, haddana waxa loo baahan yahay in xoolaha si cilmi ah loo dhaqo oo loo xannaaneeyo. Taasi waxay keeni kartaa in xooluhu sii fiicnaadaan oo ay hilibkooda iyo caanahooduba sii bataan. Marka ay sidaasi suuragal noqoto, xooleheena faa'iidada laga helaa way sii kordhaysaa marba markii ka sii dambaysa.

**LAYLIS:**

1. Waa maxay baadku?
2. Xoolaha nool ee Soomaaliya joogaa maxay ka kooban yihiin?

   Waa maxay gammaanku?
3. Sidee bay xoolaha nooli dhaqaaleheena saldhig ugu yihiin?
4. Haddii dadka Soomaaliyeed ee xoolaha dhaqdaa ay xoolaha nool aad u yaqaaniin, muxuu cilmigu u kordhinayaa?
5. Xoolaha nool aynu debedda u diraa maxay inoo taraan?



## DALKA SOOMAALIDA IYO XOOLAHA NOOL

Hore waxa aynu u sheegnay in dadka Soomaaliyeed badankoodu xoolaha ku nool yihiin. Dadka Soomaaliyeed boqolkiiba siddeetan (80%) ayay noloshoodu xoolaha nool ku xiran yahay. Lacagta adag ee aynu adduunka wax kaga soo iibsano boqolkiiba toddobaatan (70%) 'yaynu ka hellaa xooleheena nool.

In kasta oo ilaa maanta aan la hayn tirada dhabta ah ee xoolaha nool, haddana marka la qiyaaso waxa la yiraahdaa dalkeena waxa jooga labaatan malyuun iyo shan boqol oo kun oo neef (20.5 malyuun) oo isugu jira Geel, Lo' iyo Ari. Tiradda dhabta ah sidii loo helayay hadda ayaa la wadaa dakhsona way u soo baxaysaa.

Dalka Soomaalidu waxa uu leeyahay meelo badan oo xoolaha nooli ay ku dhaqmi karaan oo baad iyo biyoba laga helo. Dhulka xoolaha ku habboon waxa lagu qiyaasaa shan iyo Soddon (35) malyuun oo hektaar. Dhulkaa xoolaha u fiican, haddii laga shaqeeyo waxa dhab ah in xoolaheennu sii wanaagsanaan karaan oo si fiican looga faaiidaysan karo. Xoolaha horumarintoodu waxay ku xiran tahay dhulka ay daaqaan sida uu yahay xagga daaqa iyo xagga biyahaba. Sidaa aawadeed haddii la rabo in xoola fiican la helo, waa in xoolaha dhul fiican oo daaq leh loo helaa.

**LAYLIS:**

1. Dadka Soomaaliyeed haddii boqolkiiba Siddeetan ay noloshoodu xoolaha nool ku xiran tahay, inta kale maxay qabtaan?
2. Waa maxay lacgta adki?
3. Haddii dadka Soomaaliyeed tiradoodu tahay 4 malyuun oo qof, oo ay xooleheenu yihiin 20 malyuun, qokiiba imisa neef ayuu yeelan karaa?
4. Ololaha Horumarinta Reer Miyiga waxa ku jira in xoolaha nool la tiriyo. Tiradaa waa maxay faa'iidadeedu?
5. Sidee bay xoolaha nool noloshoodu ugu xiran tahay dhulka ay daqaan?

## DAAQA DHULKA

Casharkii hore waxa aynu ku sheegnay in dalkeenu leeyahay dhul badan oo ku habboon in xooluhu daaqaan. Dhulkaa xooluhu inay daqaan ku fiicani haddii aan si degdeg ah wax looga qaban, waxa laga yaabaa in uu sii xumaado.


Dhibaatooyin badan ayaa dhulka daaqa leh is hortaagi kara. Kuwaa waxa ka mid ah biyaha oo sidoodaba aan dhulka ku badnayn oo aan ku filayn dadka iyo xoolohooda. Tan labaad waxa weeye iyada oo dhul daaqiisu fiicnaan lahaa oo uu ka mid yahay labada webi dhexdoodu, looga qaxay gendiga oo ku badan. Gendiga xoolaha waxa qaadsiiya dukhsi u eg dhuugga oo marka uu neefka qaniino cudur halis ah kaga taga.


Arrinka saddaxaad ee daaqa halis gelin karaa waa dhulka oo sannadba sanadka ka dambeeya sii nabaad guuraya. Nabaad guurka badanaa waxa keena dabaysha iyo biyaha oo dhulka ciidda wax ku bixi karaan ka qaada. Daaqa waxa kale oo yareeyey xoolihii oo dhulkii ku batay, dhulkii la daaqi jiray oo qaarkii laga sameeyay tuulooyin iyo magaalooyin iyo dhulka oo aan xoolaha loo seerin waqtiyada qaarkood. Dhulku, haddii laga rabo daaq fiican waxa uu u baahan yahay in la nasiyo si geeda fiicani uga soo baxaan.

Daaq fiican si xoolaha nool loogu helo, waxa loo baahan yahay in biyo la soo saaro, in nabaad guurka laga la dagaalamo, in tirada xoolaha iyo dhulka la daaqi karo la isu qiiyaaso iyo iyada oo dhulka la nasiyo.

Waxa kale oo dhibaatodaaqa u geysta dhirta oo la gubo ama la gooyo taas oo keenta in ciiddii fiicnayd gubato oo dhulkii waxba ka soo bixiwaayaan. Waxa loo baahan yahay markaa in dadka reer baadiyaha ah aqoontoodii xagga daaqa iyo wixii wax yeelaya sare loo qaado.







L A Y L I S :

1. Sheeg saddex wax oo daaqa dhulka is hor taagi kara?
2. Labada webi ee Juba iyo Shabeele dhexdoodu waa meel aad u daaq fiican. Dhulkaa maxa xoolaha loo dejin waayay?
3. Gendiga iyo dulinka kale ee xoolaha cudurka qaadsiiya sidee baa loola dagaalami karaa?

4. Sheeg saddex wax oo keena nabaad guurka?

5. Waqtiyada qaarkood waxa loo baahan yahay in dhulka qaarkii la nasiyo oo la seero, Sidaasi daaqa maxay taraysaa?

## GOBOLLADA IYO XOOLAHA NOOL

Dhulka Soomaalida ma jiro gobol aan xoola joogini. Meel kasta xoolaha joogaa waxay ku xiran yihiin marba cimilada dhulka sida ay tahay, daaqa iyo biyaha. In kasta oo ay gobol kasta xoola joogaan, haddana xooluhu dhulka way ku kala badan yihin.

### GEELA

Geelu waxa uu ku noolaan karaa dhulka aan baadka iyo biyuhu ku badnayn. Sidaa waxa ugu wacan iyada oo geelu uu in badan u adkaysan karo gaajada iyo harraadka. Marka taa la fiiriyo, geelu gobol kasta wuu ku noolaan karaa. Waxa geelu si fiican ugu noolaan karaa gobollada Togdheer, Woqooyi Galbeed, Mudug, Bay, Gedo, Shabeellada Dhexe, Shabeellada Hoose iyo Jubadda Hoose. Geelu si fiican uguma dhaqmi karo dhulka gendiga leh sida labada webi dhexdooda.

### ARIGA

Arigu waxa uu u qaybsan yahay ido iyo riyo. Iduhu waxay si fiican ugu dhaqmi karaan dhulka cawska leh ee dhirta waaweyni ay teelteelka ku tahay. Sidaa aawadeed gobollada waxa ugu ida badan: Sannaag, Togdheer, Woqooyi Galbeed, Bari, Nugaal iyo Galguduud.

Riyuhu waxay si fiican ugu dhaqmi karaan dhulka caleenta leh. Riyaha jaadadkoodu way badan yihiin. Guud ahaan marka aynu eegno riyuhu gobollada badankooda way joogaan. Riyaha jaad waxay ku nool yihiin xeebaha Shabeellada Dhexe iyo Shabeellada Hoose, jaadna Woqooyi Galbeed, Togdheer, xeebaha Bari, Nugaal, Hiraan iyo Gobollada Kaleba.



### LO'DA

Lo'du had iyo jeer waxa ay u joogtaa dhulka cawska iyo biyuhu kub adan yihiin. Lo'du kama maaranto biyaha inay maalin walba cabto. Sida la filayo lo'du dhulkeenna waxay ku badan tahay wabiyada harcerohooda. Gobollada ay lo'du ugu badan tahay waa Jubadda Hoose, Shabeellada Hoose, iyo Shabeellada Dhexe. Gobollada kale waxay lo'du ku dhaqan tahay Hiiraan iyo degmooyinka Gabilay iyo Boorama.

LAYLIS:

1) Sheeg sida ay cimilada dhulka iyo xoolaha nooli isugu xiran yihiin.

2) Gobolka Togdheer sannadka intiisa badan waa kulul yahay, biyuhuna dhulka way ku yar yihin. Gobolkaasi ma lo'duu u fiican yahay mise geela?

3) Weeraha hoos ku qorani ma run baa mise waa been?
   b) Iduhu waxay ku noolaan karaan dhulka cawska iyo dhirtu ku badan yihiin.
   t) Gobollada Soomaalida waxa ugu ida badan Jubadda Hoose iyo Galgaduud.
   j) Riyuhu waddankeenna gobol kasta way ku noolaan karaan.
   x) Lo'du biyaha kama maarmi karto.
   kh) Gobollada dhulkeenna waxa jira qaar aan xoola joogin sida kuwa xeebaha.

## DHIBAATOOYINKA XOOLAHA NOOL

Dhibaatooyinka xoolaha nool ka kor yimaada way badan yihiin waxaana ku jira:

1. Daaqa iyo biyaha oo yaraada.

Sida la ogsoon yahay, dhulkeenna marmar ayaa roobka ku da'aa uu aad u yaraadaa. Roobka yaraantiisu ama la'aantiisu waxay keentaa abaar u sabab noqota biyaha iyo baadka oo ya-

raada. Haddii baadka iyo biyuhu yaraadaan, xooluhu waxay u dhintaan nafaqa la'aan.

2. Xoolaha oo dhulka ku bata:

Sidii aynu dersikii hore ugu sheegnay, dhulka daaqa fiican iyo xooluhu isuma qiyaasna oo xoolaha ayaa marmar dhulka ku bata. Taasi waxay keentaa in dhulka wixii ka soo baxaba ay xooluhu markiiba dhameeyaan oo dabadeedna uu dhulkii boodh ka kaco oo uu nabaad guuro.

3. Cudurro.

Dhibaatada saddexaad waxa weeye xoolaha oo ay cudurro kala duwani ku dhacaan. Cudurradaa qaarkood waxa keena iyada oo dulin xoolaha korkooda ku dhasho. Dulinka waxa ka mid ah shilinta, kudkudaha, gendiga iyo kuwo kale oo badan.

4. Ayax, Diir iyo wixii la mid ah:


In kasta oo aan in muddo ah ayax waddanka lagu arag, haddana waxa dhacda in marmar ayaxa iyo diirtu bataan oo ay daaqa dhibaato weyn u geystaan.

In kasta oo intii Kacaanku jiray arrimahaa badankooda wax laga qabtay oo loo sameeyay wakaalad u qaybsan, haddana weli halkii la doonayay lama gaarin.

Wakaaladda Horumarinta Xoolaha waxay waddaa barnaamij dheer oo loola dan leeyahay inay daryeesho xoolaha noloshooda.

Barnaamijka waxa ku jira in biyaha toggaga la xiro, in ceelal dhulka daaqa leh laga qodo, in cudurrada xoolaha lala dagaalamo, in dulinka la cirib tiro iyo in wixii daaqa iyo dhirta dhibaato u geysanaya la joojiyo. Barnaamijkaasi haddii uu hirgalo, waxa la filayaa in xoolaha nool noloshoodu hagaagto, ganacsigooduna sii fiicnaado.





**LAYLIS:**

1) Maxaa keena daaq iyo biya yaraanta? Haddii daaqa iyo biyuhu yaraadaan, maxaa ku dhici kara xoolaha?

2) Sidee baanay xoolaha iyo dhulka daaqa lihi isugu qiyaasnayn?

Haddii meel toban neef oo geel ahi daaqi karaan toban maalmood imisa maalmood ayay meeshaa labaatan geel ahi daaqi karaan?

3) Waa maxay dulinku?

4) Maxay qabataa Wakaaladda Horumarinta xooluhu?

5) Ayaxa iyo diirtu sidee bay daaqa dhibaato ugu geysan karaan?

## DHIBAATOOYINKA GANACSIGA XOOLAHA NOOL

Sidii aynu hore u sheegnay, lacagta aynu wax adduunka kaga soo iibsano badankeeda waxa a u ka hellaa ganacsiga xoolaha nool. Haddii arrinku caynkaas yahay waxa loo baahan yahay in wixii dhibaato u gaysanaya ganacsigaa wax laga qabto.

Dhibaatooyinka xoolaha ganacsigoodu way badan yihiin. Tan ugu horaysaa waxa weeye iyada oo xooleheenu suuqyada debedda aanay kula beritami karin kuwa dunida kale sida Arjantiin, Ustareeliya iyo dalka Turkiga. Taasi waxa ay ka timaadaa iyada oo xooleheenu xagga miisaanka ka yaryar yihiin kuwa wadanadaa. Ta labaad waxa weeye iyada oo markii hore aan xoolaha loogu talo geli jirin dhul ay ku nastaan iyo geedo iyo biyo marka ay in la dhoofiyo sugayaan. Dhibaatadda saddexaad waxa weeye iyadao o maraakiibta xoolaha debedda gaysaa aanay ahayn kuwo loogu talo galay in xoola lagu dhoofiyo

Arrimahaa markii la arkay inay wax u dhimayaan ganacsiga xoolaha, waxa la sameeyay wakaalada Horumarinta xoolaha oo laga rabo inay arrimahaa wax ka qabtaan.

Arrinta ugu horeysa ee ay Wakaaladdu ku dhaqaaday waxa weeye in ay samaysay dhul xoolaha lagu nasiyo oo lagu sii daweeyo inta aan la dhoofin. Taa waxtarkeedu waxa weeye in xoolihii la si naaxiyo inta aan dekedaha la geyn. Mar labaadka waxa lagu tala galay in xooluhu ay biyo iyo geedo ka helaan dekedaha laga dirayo. Dawladdu hadda waxay bilowday inay soo iibiso maraakiib in xoola lagu dhoofiyo loogu tala galay taas oo dhibaatadii gaadiidka inaga saaraysa.

Haddii xooleheena nool sidaa loogu dedaalo waxa dhab ah in ay si fiican uga qayb geli karaan ganacsiga suuqyada adduunka.

**LAYLIS:**

1. Maxaa ka mid ah arrimaha aanay xooleheennu maanta xoolaha Arjantiinu u la beretami karin xagga ganacsiga?



2. Muxuu tarayaa dhulka loogu talo galay in xoolaha lagu sii nasiyaa?
3. Berigii hore marka xoolaha dekedaha la geeyo, looguma talo geli jirin biyo iyo caws ku filan. Taasi maxay dhibaato keeni jirtay?
4. Haddii aad tahay xoola dhaqato, sidee baad xoolahaaga u naaxin lahayd?

## BEERAHA

Dalka Soomaaliyeed dhulkiisa marka sideed meelood loo qaybiyo meel ahaan ayaa ku habboon beeris, hase yeeshee, inta hadda la beeraa waa in yar. Dhulka la beero intiisa badan waxa lagu beeraa badar xilliga roobabku da'ayaan. Beeridda badarku ma'aha mid ganacsi ee waa mid baahida dadka oo qudha ku kooban.

Beeruhu dhaqaalaha Soomaalida waxa ay kaga jiraan meel weyn, hase yeeshee dadaal badan lama siin jirin intii kacaanka ka horeesay.

Waxa jira waxyaalo badan oo kala duduwan in laga beeri karo dalkeena oo ay si wanaagsana uga bixi karaan. Inkasta oo dhibaatooyinka ugu waaweyn ee dadka beeraleyda ihi la kulmaan ay biyo yaraan ama biyo la'aan tahay, haddana dadka Soomaaliyeed ee beeraleyda ihi way ku dadaalaan wax beeridda iyada oo dawladda kacaanka ihina ku dhiiri gelinayso.

Dalkeena Gobollada beeruhu ugu badan yihiin waa:

1. Shabeelada Hoose.
2. Jubbada Hoose.
3. Jubbada Sare.
4. Hiraan (Labada Webi agagaarkooda).
5. Iyo Gobolka Waqooyi Galbeed.

## MEELAHA BEERISTA KU HABBOON

Dalkeena meelaha beerista aad ugu habboon waxa ka mid ah: Banka Sareey, Dooxada Juba. Qaybteeda loo yaqaan Banka fafadoon, Buur-Xakaba, Banka ay ku faafaan Webiyada Shabeele iyo Jubba, Gebiilay iyo Boorama oo Woqooyi Galbeed ah.

Dhulkaas badanaaba waxa ka baxa Mesego, Galley, Cudbi iyo Khudrad lagu beero biyaha roobka. Waxyaalaha kale ee dalka ka baxa waxa ka mid ah Muuska. Qasabka, khudradda Bambeelmada, Mafafayga iyo Canbaha. Waxyaalahaasi dhamaan waxa ay ku baxaan waraabin. Waxa kale oo waraabinta lagu tijaabiyey beerista Bariiska iyo Buuriga, waana lagu guulaystay labadaba

**LAYLIS:**

1. Sheeg saddex meelood oo dalkeena ka mid ah kuna habboon beerista?
2. Sheeg Gobol beerihiisu ku baxaan biyaha roobka oo qudha.
3. Sheeg saddex dalag oo ku baxa waraabin?
4. Sheeg laba dalag oo ku baxa biyaha roobka?
5. Gabiiley iyo Boorama gobolkee bay ku yaaliin?

## NOOCYADA BEERAHA

Beeraha dalkeenu waxa ay u qaybsamaan dhawr qaybood:

1. Beero waaweyn oo dawladu leedahay, kuwaasoo waraabin ku baxa.
2. Kuwa kale, ama beeraha kale, waa kuwo yar yar oo dadka beeralaydu fashaan, inta badana waxa ay ku baxaan roobka.

## BEERAHA ROOBKA KU BAXA

Beeraha roobka ku baxa badanaa waxa lagu beeraa, haruurka ka Cas iyo ka Cad labadaba. Waxa kale oo ku baxa Galleyda inkasta oo galleydu meel kasta oo biyo wanaagsan leh si fiican uga baxdo.



## BEERAHA WARAABINTA

Beeraha waraabka ku baxaa waxa ay gaar u yihiin labada webi hareerahooda. Waxyaalaha ugu muhimsan ee waraabka ku baxa waa Muuska iyo Qasabka. Muusku dhaqaalaheena meel weyn buu kaga jiraa. Waa ka keliya ee labeeya xoolaha nool ee aynu dibada u dhoofino.

Muuska waxa aynu u diraa intiisa badan dalka Talyaaniga inkasta oo kuweyt iyo Sucuudiguna hadda waxa inaga qaataan.

Muuska dalalka aduunku soo aaraan oo dhan marka lo qiyaaso dalkeenu waxa uu soos aara boqolkiiba laba (2%)

Qasabku waa shayga labaad ee waraabka ku baxa; waxana uu ka baxaa Jawhar. Danta dawlada kacaanku ka leedahay qasabka waa in Sokorta dalka ka soo baxdaa wadaanka ku filaato. Waxyaalaha kale ee soo raaca ee waraabka ku baxa waxa ka mid ah: Bambeelmada, Canbaha, Mafafayga, Cudbiga iyo Yaanyada, kuwaas oo badankooda wadanka gudihiisa lagu isticmaalo. Hase yeeshee waxoc͏ggaa Bambeelma ah ayaa dalka Talyaanigu inaga qaataa.

**LAYLIS:**

1. Intee nooc ayaa beeraha dalkeenu u qaybsamaan?
2. Laba dalag oo roobka ku baxa sheeg?
3. Maxay yihiin labada dalag ee ugu muhimsan waxyaalaha waraabka ku baxa?
4. Sheeg saddex wadan oo muuskeena loo dhoofiyo?
5. Labada shay ee dhaqaaleheena ugu muhimsan sheeg?

## DIBAATOOYINKA BEERAHA HORTAAGAN

Dibaatooyinka beeraheena hortaagani aad bay u badan yihiin, kuwa ugu waaweyna waxa ka mid ah:

1. Biyo yaraan ama Biyo la'aan.
2. Carada oo nabaadguur ku dhaco.

3. Cuduro ku dhaca waxyaalaha la beero oo ay keenaan Cayayaanka yar yar qaarkood.

4. Xayawaano iyo cayayaanka qaarkii oo waxyeeleeya beeraha sida Shimbiraha, Maroodiga, Ayaxa iyo wixii la mid ah.

5. Webiyada oo mar marka qaarkood fataha oo beeraha baabi'iya.

LAYLIS:

1. Sheeg saddex xayawaan oo beeraha waxyeeleeya?
2. Marka webiyadu fatahaan maxaa dhaca?

## HORUMARINTA BEERAHA

3. Maxaa keena cudurada beeraha ku dhaca?
4. Biyo yaraanta maxaa keena?

Si wax soo saaridda beeraheena loo kordhiyo waa in lagu dadaalaa horumarintooda. Waxyaabaha ugu daran ee u baahan in wax laga qabto waxa ka mid ah:

1. In la bedalo habka gabowga ah ee hadda wax loo beereto;

2. Cayayaanka wax yeelaynaya oo lala dagaalo;

3. Abuur wanaagsan oo caafimaad qaba oo la isticmaalo kolka wax la beerayo;

4. Carrada oo la nafaqeeyo, iyada oo la isticmaalo waxyaalaha carrada nafaqada ku kordhiya ama carradu nafaqada ka hesho;

5. Webiyada oo la xiro si dhibaatadooduna u yaraato biyahoodana looga faa'iidaysto;

6. Dawladda oo ku dadaasha sidii dadka beeralayda ah aqoontooda xagga beeraha loo kordhin lahaa.



## BIYAHA

Biyaha dalkeena lagu manaafacaadsado ee beeraha lagu waraabiyo, dadka iyo xooluhuna ku nool yihiin waa:

Biyaha cirka (Roobka), Webiyada (Shabeele iyo Juba) iyo kuwa Ceelasha iyo baliyada.

## ROOBABKA

Roobabku si ugama wada da'aan Gobollada iyo degmooyinka dalku ka kooban yahay. Waxa jira meelo roob wanaagsani ka da'o sannad walba iyo meelo roob yari ka da'o sannadkii, mar marka qaarkoodna roobba aanu helin dhowr sannadood oo isku xigga, ama muddada uu roobku da'ayaa ay tahay mid gaaban.

Sidaa darteed ayaa dalkeena intiisa badan ay adag tahay in wax lagu beero, maxaa yeeley la iskuma halayn karo biyaha cirka ee sannadna yaraanaya sannadna la waayayo.

## WEBIYADA

Dalkeenu waxa uu leeyahay laba webi oo la yiraahdo Shabeele iyo Jubbe. Labadaa webi aad bay waxtar weyn ugu leeyihiin nolosha dadka Soomaaliyeed.

Beeraha jooggtada loo beeri sannadkii oo dhan waxa laga helaa labada webi hareerahooda. Sababta oo ah in labada webi biyahoodu socdaan sannadka oo dhan, sannad Abaar xumi dhacdo mooyiye.

Sidaa aawadeed ayaa beeraha waaweyn oo dhan sida kuwa muuska ay ku taxan yihiin hareeraha labadaa webi.

## CEELASHA

Biyaha cirka iyo webiyada waxa soo raaca biyaha ceelasha. Ceelasha waa la qodaa, dalka intiisa badanna way ka qodan yihiin. Dalkeena intiisa badan waa laga qodi karaa ceelal, inkasta oo meelaha qaarkood dhibaato lagala kulmo.

Ceelashu waxa weeye qudha ee jilaalkii dadka iyo xooluhu biyaha ka helaan, gaar ahaan meelaha oo manaha ah.

**L A Y L I S :**

1) Magacaw labada webi ee waaweyn ee dhulkeena?

2) Maxay u adag tahay in wax laga beero dhulkeena intiisa badan?

3) Beeraha Muuska xaggee laga helaa?

4) Xilliga Jilaalka ah xaggee baa reer guuraagu biyo ka helaa?

5) Biyaha beeruhu ku baxaan xaggee bay ka yimaadaan?

## WAKAALADDA HARUMARINTA BIYAHA

Markii dawlada Soomaaliyeed araktay in biyuhu lagama maarmaan u yihiin dadka iyo xoolahaba ayey sameeysay wakaaladda horumarinta biyaha oo loo xil saarey in ay:

1. Ceelal ka qodo meelaha oo manaha ah, gaar ahaan meelaha baadiyaha ah ee ay reer guuraaga iyo xooluhu ku badan yihiin, si ay marka aan roobabku jirin u helaan biyo.
2. Baliyo ama haro biyaha roobka qabta oo kaydiya si dadka reer miyiga ihi uga dhaansadaan, xoolahana uga waraabsadaan marka aan roobabku jirin.
3. Sameeso biyo xireeno qabta biyaha webiyada iyo tegaga si looga faa'iidaysto oo beeraha loogu waraabiyo.
4. Sameeso ama dejiso habkii ama nidaamkii magaalooyinka Jamhuuriyadu biyo fiican oo ku filan u heli. la haayeen iyo waxyaalo la mid ah.

Mashaariicda Wakaaladdu iminka gacanta ku hayso waxa ugu weyn oo ugu muhimsan mashruuca biyo-xireenka Jawhar. Mashruucaasi marka uu dhamaado waxa uu kaydin doonaa 200 oo malyuun oo mitir oo saddex jibbaar ah oo biyo ah. Biyahaa waxa lagu beeri doono42,000 oo hektaar. Mashruucan isaga ah waxa Wakaaladda la wada Wasaaradda Beeraha.



**L A Y L I S :**

1. Sheeg saddex (3) shey oo Wakaaladda Horumarinta Biyaha loo xil saarey in ay wax ka qabato?
2. Maxay ahayd baahida keentay in la sameeyo Wakaaladda Horumarinta Biyaha?
3. Mashruuca biyo-xireenka ee Jawhar intee buu le'eg yahay?
4. Mashruucaas biyihiisa intee buu le'eg yahay dhulk lagu beeri karaa?